

Male Circumcision

Male circumcision is the removal of the foreskin around the end of the penis. If you decide on circumcision, your baby's doctor will do it in the nursery. If your baby is small or has any medical problems, the circumcision may need to be done later. The doctor will have you sign a consent form before the circumcision is done.

During the Procedure

- The doctor will put a numbing medicine gel on the penis.
- Your baby may be offered a pacifier dipped in sugar water to ease pain.
- Your baby's legs will be held still while the foreskin is removed.
- Vaseline gauze may be placed around the end of the penis for the first 24 hours. This is to prevent the penis from sticking to the diaper.
- The procedure will last 5 to 10 minutes.

Your Baby

- Your baby may be fussy, not eat well or sleep more for the first 24 hours.
- Hold and comfort your baby.
- Redness, swelling and a small amount of bleeding may occur for the first 48 hours.
- As it heals, yellowish-white patches may appear. Do not try to wipe these off. The patches will go away as the circumcision heals.

Care After Circumcision

- Clean the penis gently with warm water each day. Pat dry.
- Watch for signs of infection such as redness, swelling or a foul odor.

Gudniinka Wiilasha

Gudniinka wiilashu waa maqaarka hore ee ku wareegsan dhamaadka buuryada oo la jaro. Haddii aad go'aan ku gaadhid gudniin, ilmaha dhakhtarkaaga ayaa ku sameyn doona qaybta xanaanada. Haddii ilmahaagu uu yar yahay ama uu leeyahay dhibaatooyin caafimaad, waxa laga yaabaa in loo baahdo in gudniinka la sameeyo wakhti kale. Dhakhtarku waxa uu kaa saxeexi doonaa foom oggalaansho ka hor inta aan la sameyn gudniinka.

Inta Lagu Jiro Habka Hawsha

- Dhakhtarku waxa uu buuryada marin doonaa dawo kabuubyo keenaysa ama xanuunka baabi'inaysa.
- Ilmahaaga yar waxa la siin karaa mujuruc sonkor la galiyay si xanuunka looga yareeyo.
- Lugaha ilmahaaga waa la qaban doonaa inta laga jarayo maqaarka hore ee buuryada.
- Waxa laga yaabaa in faashad faasliin leh (Vaseline) lagu wareejiyo dhamaadka buuryada mudo ah 24 saacadood. Waxa taa loola jeedaa si aan buuryadu ugu dhagin xufaayadda ama dheebarka.
- Hawshu waxay socon doontaa 5 ilaa 10 daqiiqadood.

Ilmahaaga

- Waxa laga yaabaa in ilmahaagu uu ooyo, ama aanu si fiican wax u qaadan ama uu hurdo intii hore ka badan yeesho 24-ka saacadood ee ugu horeeya.
- Xeji oo deji ilmahaaga.
- Waxa laga yaabaa in casaan, barar iyo qadar yar oo ah dhiig la arko 48-ka saacadood ee ugu horeeya.
- Marka ay sii bogsato, waxa laga yaabaa in la arko baro midabkoodu yahay hurdi ama jaale cadaan xiga. Ha isku dayin in aad ka masaxdid. Barahaasi waxay iska tagi doonaan marka ay bogsato goobta gudniinku.

Ka Dib Gudniinka

- Biyo diiran si tartiib ah ugu nadiifi buuryada maalin kasta. Maro ku-taataabasho ku qalaji.
- La soco calaamadaha caabuqidda ama cudur-galka sida casaan, barar ama ur qadhmuun.

- Put a small amount of petroleum jelly such as Vaseline at the end of the penis. Do this for 5-7 days each time you change the diaper.
- Your baby can take a tub bath after the circumcision is healed and the umbilical cord has fallen off.

Call Your Baby's Doctor if there is:

- A lot of bleeding or large areas of blood on the diaper
- Increased redness or swelling
- A foul odor
- No urine output within 12 hours of the circumcision

Talk to your baby's doctor if you have any questions or concerns.

- Mari qadar yar oo ah labeen baatroot sida faasliin (Vaseline) dhamaadka buuryada. Tan samee 5 ilaa 7 maalmood wakhti kasta oo aad beddelaysid xufaayadda ama dheebarka.
- Waxa aad ilmahaaga siin kartaa qubeys ah gudaha saxanka ka dib marka goobta gudniinku bogsato ee ay xuduntu ka go'do.

Wac Dhakhtarka Ilmahaaga haddii:

- Uu jiro dhiig-bax badan ama meelo waaweyn oo dhiig leh ay ku yaalaan xufaayadda ama dheebarka
- Uu jiro casaan ama barar soo kordhay
- Ur qadhmuun
- Aanay kaadi ka iman gudaha 12 saacadood ka dib

La hadal dhakhtarka ilmahaaga haddii aad qabtid su'aalo ama walaac.

2/2007. Developed through a partnership of Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center, and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com.

Male Circumcision. Somali.